



Sida ay lacagta lagu masruufo ilmaha u saamayso Family Tax Benefit (lacagta carruurta)

Haddii aad qaadato Family Tax Benefit (lacagta carruurta) oo aanad xidhiidh la lahayn waalidka kale ee ilmahaaga, waxa laga yaabaa inaad u baahato inaad codsato lacagta lagu masruufo ilmaha .

Waa maxay lacagta lagu masruufo ilmaha

Lacagta lagu masruufo ilmaha waa lacag uu mid ka mid ah waalidiinta siiyo waalidka kale si ay uga caawiso kharashka ay ku daryeelayaan ilmahooda.

Labada waalidba waxay mas'uuliyad ka saaran tahay kharashka lagu korinayo ubadka xitaa haddii aysan xiriir la lahayn ama mid ka mid ah waalidka uu ku nool yahay dalka dibaddiisa.

Markaad codsato lacagta lagu masruufo ilmaha, waan idiin sheegi doonaa adiga iyo waalidka kale ee looga baahan yahay inuu bixiyo lacagta lagu masruufayo ilmaha iyo sidoo kale inta la bixinayo.

Services Australia ayaa sidoo kale kuusoo qaadi karto lacagtaan.

Sida ay lacagta lagu masruufo ilmaha u saamayso Family Tax Benefit (lacagta carruurta)

Lacagta lagu masruufo ilmaha iyo Family Tax Benefit Part A way isku xiran yihiin.

Inta aad heli doonto ee ah lacagta lagu masruufo ilmaha waxay saamayn kartaa lacagtaada Family Tax Benefit Part A.

Haddii ay kuu joogaan ilmo kuugu dhashay xiriir aad hore u lahayd aadna qaadato Family Tax Benefit (lacagaha carruurta), waxaad haysataa wakhti go'an oo aad ku codsan karto lacagta lagu masruufo ilmaha.

Muddadaas aad heysato markii la dhafo, haddii aadan wali codsan lacagta lagu masruufo ilmaha ama aadan nala soo xiriirin si aad noogala hadasho fursadahaaga, waxaa laga yaabaa inay yaraato Family Tax Benefit (lacagtaada carruurta) ilaa inta aad ka codsanayso.

Haddii ay jiraan sababo aadan u codsan karin lacagta lagu masruufo ilmaha , waxaad u baahan tahay inaad na soo ogeysiiso.

Sida loo codsado lacagta lagu masruufo ilmaha

Si aad u codsato lacagta lagu masruufo ilmaha, waxaad u baahan tahay inaad wacdo shaqaalaheena Services Australia Child Support oo laga wici karo **131 272**.

Si aan u aqbalno codsigaga, waxaan u baahannahay inaan hubinno cidda ay yihiin waalidka dhalay ilmaha. Waxaa laga yaabaa inaan ku waydiino inaad ka jawaabto dhowr su'aalood ama aad na siiso dukumiintiyo. Caadiyan waxaan sidoo kale u baahanahay inaan la hadalno waalidka kale ee ilamaha dhalay.

Haddii aadan codsan karin lacagta lagu masruufo ilmaha

Waad noo soo sheegi kartaa haddii ay jiraan sababo aadan uga codsan karin lacagta lagu masruufo ilmaha waalidka kale ee ilmahaaga dhalay. Sababahaas waxay noqon karaan:

- sababo dhaqan
- sababo la xiriira rabshado qoys iyo guriga
- haddii codsashada aad codsanayso lacagta lagu masruufo ilmaha ay kugu abuuri karto inaad dareento marxalad amni darro
- sababo kale oo xasaasi ah.

Waxaad u baahan doontaa inaad la hadasho mid ka mid ah shaqaalahayaga bulshada oo aad u sheegto sababta aadan u codsan karin lacagta lagu masruufo ilmaha .

Markaas waan kaa dhaafi karnaa, oo uma baahnid inaad waalidka kale ee ilmaha dhalay aad weydiisato inay bixiyaan lacagta lagu masruufo ilmaha .

Wixii macluumaad dheeraad ah

- Wac **131 202** si aad noogula hadasho luqadaada markaad nagala hadlayso Family Tax Benefit (lacagta carruurta) iyo haddii aadan codsan karin lacagta lagu masruufo ilmaha .
- Booqo xarunta Services Australia ee kuugu dhow
- tag servicesaustralia.gov.au/yourlanguage halkaas oo aad ka heli karto macluumaad aad ku akhrin karto, ku dhegaysan karto ama ku daawan karto luuqadaada.

Afeef

Macluumaadka ku jira daabacaadan waxaa loogu talagalay oo kaliya hagitaan ku saabsan lacag-bixinta iyo adeegyada. Adiga ayay masuuliyad kaa saaran tahay inaad go'aansato haddii aad rabto inaad dalbato lacag bixin iyo inaad sameyso codsi ku saabsan xaaladahaaga gaarka ah.



How child support affects your Family Tax Benefit

If you get Family Tax Benefit and you are not in a relationship with the other parent of your child, you might need to apply for child support.

What is child support

Child support is money a parent pays to the other parent to help with the costs of looking after their child.

Both parents are responsible for the costs of bringing up a child even if they are not in a relationship or one of the parents lives overseas.

When you apply for child support, we will tell you and the other parent who needs to pay child support and how much to pay.

Services Australia can also collect this money for you.

How child support can affect your Family Tax Benefit

Child support payments and Family Tax Benefit Part A are linked.

The amount of child support you get can affect your Family Tax Benefit Part A.

If you have a child from a previous relationship and get Family Tax Benefit, you have a set time to apply for child support.

After this time, if you have not applied for child support or contacted us to talk about your options, you may get less Family Tax Benefit until you apply.

If there are reasons you cannot apply for child support, you need to let us know.

How to apply for child support

To apply for child support, you will need to call our Services Australia Child Support staff on **131 272**.

To accept your application, we need to check who the birth parents of the child are. We may ask you to answer some questions or give us some paperwork. We usually need to talk to the other parent too.

If you cannot apply for child support

You can let us know if there are reasons you cannot apply for child support from the other parent of your child. These can be:

- cultural reasons
- family and domestic violence
- if claiming child support makes you feel unsafe
- other reasons that are sensitive.

You will need to talk to one of our social workers and tell them why you cannot apply for child support.

We can then give you an exemption, so you do not need to ask for child support from the other parent.

For more information

- Call **131 202** to speak with us in your language about Family Tax Benefit and if you cannot apply for child support.
- Visit your local Services Australia service centre.
- Go to **servicesaustralia.gov.au/yourlanguage** where you can read, listen to or watch information in your language.

Disclaimer

The information contained in this publication is intended only as a guide to payments and services. It's your responsibility to decide if you wish to apply for a payment and to make an application with regard to your particular circumstances.